

# Ku soo dhawoow dugsiga Kleppskulen



---

Buugyare warbixineed oo ku socda  
waalidka ardayda ajnabiga ah oo ku  
saabsan wadashaqaynta guriga iyo dugsiga

## **Wadashaqaynta guriga- iskuulka**

Waa muhiim in iskuulka iyo gurigu wadashaqayn fiican samaystaan. Si ay suurtagal u noqoto waa in xidhiidh fiican la yeesho. Wadashaqaynta wacan waxa ay xoojinaysaa waxbarashada, qanansanaanta iyo kalsoonida ardayga.



*-Haddii aad war fiican ka sheegtaan iskuulka waxa ardayga u wanaagsanaanaya iskuulka -*

## **Turjumaan**

Turjumaan ayaa adeegsan kartaan markaa aad la shaqaynaysaan iskuulada degmada Klepp. Iskuulka ayaa dalbanaya turjumaan. Iskuulka u sheeg haddii aad u baahan tahay.

# **Masuuliyadda waalidka**

Waxyaalaha muhiimka ah waxa ka mid ah:

In ilmuuhu helo:

- Quraac iyo cunto iskuul oo nafaqo leh
- Hurdo ku filan

In ilmuuhu haysto:

- Dhar ku habboon hawada
- Alaabta iskuulku uga baahan yahay  
(tusaale dharka jimicsiga, kabaha gudaha, boorsada iskuulka)

Waalid ahaan in ay:

- Yimaadaan kulamada ay la hadlayaan macalinka (kulanka waalidka, shirarka waalidiinta)
- Yimaadaan shirarka waalidiinta iyo kulamada wadashaqaynta ee dugsiga
- Ka jawaabaan farriimaha dugsiga
- Dugsiga soo ogeysiyaan haddii ilmuhunka maqnaanayo xannuun dartii ama wax kale (balan dhakhtar ilko, dhakhtar caadi ah)
- Ilmaha fasax u codsadaan haddii uu fasax ka qaadanayo dugsiga
- Macalinka la xidhiidhaan haddii ay wax fahmi waayaan – su'aaluhu waa wax caadi ah!
- Ilmaha caawiyaan/dhiirigeliyaan marka ilmuuhu ka shaqaynayo layliga, iyo inay hubsaadaan in ilmuuhu samaynayo
- War wacan u sheegaan ilmaha marka ay ka sheekaynayaan dugsiga

*Idinka ayaa waalid ahaan leh masuuliyadda guud ee tarbiyadda iyo waxbarashada idinkoo la shaqaynayaan dugsiga.*

## **Masuuliyadda dugsiga**

- In ay waalidka ka taageeraan waxbarashada iyo tarbiyadda
- In ay ka qaybqaataan horumarinta bulshanimada iyo waxbarashada ilmaha
- In ay sahlaan xidhiidh iyo wadashaqayn wacan lala yeesho dugsiga
- In ay waalidka la yeeshaan wadahadal/shirar waalid. Waa dugsigu cadeeyo waxbarashada iyo isbeddelka ilmaha
- In ay abuuraan bey'ad waxbarasho oo kobcinaysa caafimaadka, qanacsanaanta iyo waxbarashada
- In ay sahlaan ka qaybqaadashada ardayga

## **FURSADDA WAKHTIGA FIRAAQADA (SFO)**

Dugsiyada hoose waxa ay leeyihii fursadda wakhtiga firaaqada oo loogu talogalay fasalada 1-4. Waa adeeg waalidku bixinayaan lacagiisa.

Waxannu idin kula talinaynaa inaad adeegsataan SFO, waayo carruurtu waxa ay halkan ku adeegsanaysaa oo ku baranaysaa af-noorweyjiga. Marka ay dadka kale la joogaan waxa ay helayaan tabobar luuqadeed iyo mid bulsheed.



# **Qaybo ka mid ah Xeerka waxbarshada**

## **§ 1-1 Ujeedada waxbarashada**

Waxbarashada dugsiyada iyo shirkadaduhu waa in, iyagoo la shaqaynaya oo afgaranaya guryaha, ay furaan albaabada aduunka iyo mustaqbalka oo ay ardayda iyo layliyada siiyan fahan iyo aasaas taariikheed iyo dhaqameed.

## **§2-1 Xaqa iyo waajibaadka waxbarashada aasaasiga ah**

Waxbarashada aasaasiga ah waa in ay caadiyan bilaabmato sannadka ilmuu buuksam 6 sanno.

(...) Xaqa iyo waajibaadka waxbarashudu waxa ay soconaysaa ilaa sannadka ilmuu ka baxayo fasalka tobnaad. (...) Haddii ardaygu isagoo aan xaq u lahayn ka maqnaado waxbarashada waajibka ah, waxa waalidka ama dadka ka masuulka ah ardayga lagu ciqaabi karaa ganaax lacageed haddii maqnaanshuu yahay mid kas ah ama oggaansho ah.

## **§2-3a Ka fasax qaadashada hawlaho wax**

Haddii waalidku soo qoro farriin qoraal ah, ardaygu fasax ayuu ka qaadan karaa qaybo ka mid ah waxbarashada dugsigu bixiyo oo marka la eego diintiisa ama waxa uu aaminsan yahay ula muuqda oofinta diin kale ama ku biirida diin kale, ama uu u arko wax dhib iyo xadgudub ku ah. Qasab maaha in la sababeeyo fasax qaadashada loo cuskaday qoddobka koowaad.

## **§2-8 Waxbarasho luuqadeed oo u gaar ah ardayda leh af-hooyo kale**

Ardayda aada dugsiga hoose/dhexe ee leh af—hooyo oo aan ahayn af-noorweyji ama af-saami waxa ay xaq u leeyihii in la siiyo waxbarasho af-noorweyji oo u gaar ah ilaa inta ay ku hadlayaan noorweyji ku filan oo ay kula socon karaan waxbarashada dugsiga. Haddii loo baahdo, ardayda noocaas ahi waxa ay xaq u yeelanayaan barashada afka hooyo, waxbarasho laba luuqadood ku baxda ama labadaba.

## **Dhibta ka iman karta ka fasax qaadashada maadooyinka**

Xeerka waxbarashadu wixa uu dhigayaa in ardayda la baro dhammaan maadooyinka waajibka ah.

Fasax qaadashadu dhib ayey ku keeni kartaa ardayga marka ay geleyaan dugsiga sare. Haddii ardaygu fasax ka qaato hal maado/qaybo ka mid ah hal maado, waxa dugsiga waayaya wax uu ku qiimeeyo ardayga. Waxa markaa dhici karta in ardaygu soo geli waayo dugsi sare.

Taas daraadeed waxa muhiim ah in aad waalid ahaan la hadashaan dugsiga haddii aad fasax ka rabtaan hal maado ama qaybo ka mid ah. Waa in la hubsado in arrinkaasi uu ardayga dhib ku keenayn mustaqbalka.

Noorway iyo Klepp waxa caadi ah in ardayda oo dhan ka qaybgasho diinta, jimicsiga iyo dabaasha.



**Klepp kommune**